



San Diego Unified
SCHOOL DISTRICT

Michelle Bell, RN
Maamulaha Barnaamijka (Program Manager)
Waaxda Kal-kaaliyaynta Caafimaadka Iyo Wanaaga
(Nursing & Wellness Dept.)
P - 619.725.5501
F - 619.725.8073
mbell@sandi.net

Ogosto 15, 2016

Waalidiinta Iyo Shaqaalaha,

Xiligii ahaa guga 2015, Wasaarada Wax Barashada (Board of Education) ayaa waxay tallaabo kale u qaadatey xaga dhinaca fulinta aragtideena ah inaan xaafad kasta ku lahaano dugsi tayo leh anagoo u mareyno inaan ansixino dib u beddelka nidaamka Wanaaga Ardayga H-7700 (H-7700 Student Wellness). Degmada Dugsiga Midaysan Ee San Diyeego (San Diego Unified) waxay u go'an tahay inay soo bandhigto degaan oo ardayda ku baran karaan inay sameyaan doorashooyin loogu talagalay caafimaad ah noloshu dhan. Waan qiraneynaa xiriirka xooga oo ka dhexeeya caafimaadka ardayda iyo wax barashadooda, iyo inaan la gaari karin ujeeddada degmada dugsiga ilaa si cad loogu qorsheeyo iyo taageero caafimaadka iyo wanaaga ardayda. Wasaarada Wax Barashada sidoo kale wey garanaysaa waa in ahmiyad la siiyo wanaaga.

Qaab Dhismeedka loogu talagalay Wanaaga (Framework for Wellness) wuxuu ka imaadey shaqo uu saacado badan u go'naa Degmada Guddigeeda Caafimaadka Dugsiga Oo Isku-duwan (District's Coordinated School Health Council), guddigaas oo ka sameysan shaqaalo, arday, waalidiin, macalimiin, maamuleyaal, wakaalado dawlada, iyo ururo ku salaysan jaaliyada. Nidaamka (policy) iyo qaab-dhismeedka (framework) waxaa la galiyey websaytka wanaaga oo degmada oo laga heli karo:

<https://www.sandiegounified.org/health-and-wellness>

Hadaad jeceshahay inaad ka qayb-qaadatid in goobta dugsigaada laga dalacsiyo wanaaga, fadlan la xiriir kal-kaaliyaha caafimaadka dugsigaada iyo/ama maamuleha goobta sidaa ula socodsiiid ayaga xiisaha aad u qabtid inaad gashid guddiga wanaaga ee dugsigaada. Waxaa kaloo la xiriiri kartaa Michelle Bell, Maamulaha Barnaamijka Ee Waaxda Kal-kaaliyaynta Caafimaadka Iyo Wanaaga/SANDAPP oo laga heli karo mbell@sandi.net ama laga wici karo taleefoonka 619-725-5501. Hadafka District Coordinated School Health Council waxaa waaye in kuli shaqaalaha iyo waalidiinta ay is-bari doonaan labadaan warqadood. Waxaa waaye rajada Board of Education, District Coordinated School Health Council iyo Xafiiska Koormeeraha Sare (Office of the Superintendent) in nidaamka iyo qaab-dhismeedka oo dib loogu noqdey ay qalab caawinaad u noqon doonaan kuli waalidiinta iyo shaqaalaha.

Si daacadnimo ah,

Cindy Marten
Koormeeraha Sare